



Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia

Springette, Off Lower Kabete Road, 1st left after Spring Valley Police Station, P.O. Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya

Tel. (25420) 4183640, 4183642/3/4; Fax (25420) 4183641

Shaqaalihii Qaradamada ee Soomaaliya ee la af-duubey oo si nabad ah lagu sii daayey

[16 Maarso 2009, NAYROOBI] – Afartii xubnood ee shaqaalaha Qaramada Midoobey ahaa ee subaxdii Isniinta la afduubey ayaa iyaga oo aan dhibaato loo geysan la sii daayey isla habbeenimadii maalinta Isniinta.

“Aad ayaan ugu faraxsanahay in shaqaalaheenii ay xor yihiin oo ay bed-qabaan. Qaramada Midoobey waxa ay aad uga mahad naqeysaa dadaalkii iyo waxqabadkii madaxda degaanka ee adeegsadey wejigooda iyo galaangalkooda si ay u hubiyaan in shaqaalaheeda dadaalka badan la daryeelo ugu dambeyntiina iyaga oo bed qaba dhaqso loo sii daayo,” ayuu yiri Mark Bowden oo ah Madaxa Qaramada Midoobey ahna Xiriiriyaha Arrimaha Bani’aadamnimada ee Soomaaliya. “Tani waa arrin muhiim ah oo inoo xaqiijineysa in joogitaanka iyo waxqabadyada Qaramada Midoobey laga oggol yahay degaannadaa ayna ilaalinayaan bulshada iyo hoggaamiyeyaasha degaanka.”

Shaqaalaha la-afduubey waxa ay la socdeen kolonyo Qaramada Midoobey ah oo u kala safreysey Xarun ay Qaramada Midoobey ku leedahay Waajid, Soomaaliya iyo garoonka diyaaradaha ee degaanka waxaana ay ka koobnaayeen saddex shaqaale caalami ah iyo hal shaqaale oo Soomaali ah. Xubnaha shaqaalaha ahi waxa ay kala ahaayeen khabiir dhinaca nafaqeynta ah oo WFP u shaqeynayey iyo laba Iskaa-wax-u-qabsadayaasha Qaramada Midoobey ah oo Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobey kala shaqeynayey Puntland. Saddexduba waxa ay habeenkaa ku dhaxayeen Waajid iyaga oo ka soo socdaaley Puntland una soo socdey Nayroobi. Shaqalaha afaraad ee la af-duubey waxa uu ahaa Soomaali ka shaqeynayey xarunta Waajid ee Adeegga Duulimaadyada ee Qaramada Midoobey.

Shaqaalaha oo ay qafaasheen koox yar oo madax-bannaan, ayaa iyaga oo aan dhibaato loo geysan lagu sii daayey dadaal degdeg ah oo ay bixiyeen madaxda degaanka. Shilkaa ma ahayn mid si toos ah loogu beegsaneyey Qaramada Midoobey.

“Sida wanaagsan ee dhaqsaha badan ee loo xalliyey shilkaa ayaa xaqiijineysa in hawlaha gargaarku ay socon karaan caqabad la’aan,” ayuu yiri Mr. Bowden. Waajid waxa ay ahayd xarun muddo dheer jirtey oo muhiim u ah adeegyada gargaarka ee Soomaaliya.”

Ku dhowaad 50 boqolkiiba dadka Soomaaliyeed, ama ilaa 3.2 milyan oo qof, ayaa ku xiran gargaarka bani’aadamnimada. Toddobadii carruur ahiba mid ayaa ay nafaqo-xumo haysaa. Badi xaaladahan bani’aadamnimo ee degdegga ah waxa ay ka jiraan gobollada Koonfureed iyo kuwa Bartamaha Soomaaliya.

Faahfaahinta dheeriga ah, kala soo xiriir Dawn Elizabeth Blalock, af-hayeenka Qaramada Midoobey ee Soomaaliya, Mobile-ka: +254-734-210-102 ama email: blalock@un.org